IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

Snanadka 13aad Muqdisho 1da Disember 1985 L. 12

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

[illegible] جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 23 ee 3 Nof. 1985, Sharciga Kalluumeysiga Soomaaliyeed.— Bog; 767

SHARCI L. 24 ee 1da Dis. 1985, Oggolaashaha Heshiiska Fududeysi iyo Horumarinta is dhaafsiga Ganacsiga ee ka dhexeeya Dawladaha Carbeed.— » 775

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 42 ee 1da Dis. 1985, Meelmarinta Heshiiska Fududeynta iyo horumarinta is dhaafsiga ee ka dhexeeya Daw. J. Carabta » 776

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٤٢ بتاريخ ١ ديسمبر ١٩٨٥ ،
التصديق على الاتفاقية الخاصة بتيسر تنبية التبادل التجارى ٧٧٧

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER WASAARADDA GAADIIDKA DH. iyo Cirka L. 8 ee 1 Jen. 1985, Abuurista Qaybta Ilaalinta Duulista Hawada » 778

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYYSIIS IWM.

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED, 12.10.85, Lumid Jeeg War. L. 631823 ku qoran C/maan Ibraahim Faarax L. 500 » 779

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 12.8.85, Lumid Jeeg War. L. 593281 ku qoran Yaasiin Maxamed Boqore L. 501 » 780

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 12.8.85, Lumid Jeeg War. L. 0157482 ku qoran Cabdi/kariin Siciid L. 502 » 781

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO, 28.11.85, Lumid 5 Jeeg War. ee Lambarradoodu kala yihiin 0000396-0000397-0196982-0439473 iyo 0197089. » 786

MAXKAMADDA G. SANAAG, 14.10.85, Lumid 2 Jeeg War. L. 0023263-0023262 ku qoran Maryan Faarax iyo Shamis Faarax » 787

SHARCI Lambar 23 Taariikh 30 Nof. 1985 Sharciga Kalluumeysiga Soomaaliyeed.

MADDAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Micnayn iyo fasiraad

Ereyada hoos ku qoran haddii aan si kale loo micnayn waxaa loola Jeedaa:

1. NAFLEY BIYOOD: Waa Dhammaan Nafleyda ku nool Badda iyo Biyo Dhuleedka oo ay ku jiraan lohodka (oyster) qolofleyda (crustacean) Plankton & Aligiga.—

2. RUQSAD; Waa Oggolaashaha loo fidiyey cid soo codsatay in ay Kalluumeysato, habeyso, ama ka Ganacsato Kalluunka iyo Nafley Biyood.—

3. KALLUUMEYSI: Waa qaab ama habab lagu daba yo Nafleyda Biyo ku noolka.—

4. KALLUUMEYSIGA HIDDAHA AH: Waa Kalluumeysiga Xeebaha dhow oo loo adeegsado Doonyaha yaryar (Huuriyada IWM).—

5. KALLUUMEYSIGA CASRIGA AH: Waa Kalluumeysiga Badda Sare oo loo adeegsado Maraakiib iyo Farsamo Casri ah sida trawlka, Purseinka, IWM.—

6. XALLINTA IDAARIGA: Waa hab kasta oo lagu xalliyo dhibaato ama gef la galay oo Maamulka Wasaaraddu Go'aan ka gaaro.—

7. WASIIRKA: Waxaa loola Jeedaa Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda.

8. ROYALIY: Waxaa loola jeedaa Qaybta Lacageed ama Badeeco oo uu bixinayo Milkiile Markab si uu uga Kalluumeysto Biyaha Dalka Soomaaliyeed.—

9. BIYO DHULE9D: Waa Biyaha Webiyada iyo Balliyada oo ay ku noolaan karaan Nafleyda ku xusan

isla Qodobkan, Faqraddiisa Koowaad.

Qodobka 2aad

Maamulka

1. Waajibaadka dhowridda, Ilaalinta, Horumarinta kalluumeysiga J.D.S. iyo Kontoroolka Guud ee Maamulka Sharcigan waxaa Masuul ka ah Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Khayraadka Badda.

2. Wasiirku wuxuu si qoraal ah u wakiilan karaa awood kasta oo Sharcigan siinayo Sarkaal kasta ama Shaqaale ka tirsan Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda.

Qodobka 3aad

Xogta Kalluumeysiga

Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda waxay Uruurineysaa tirakoobyada iyo xogta kale, isku duwidda, habeysaa soona saartaa Macluumaadka la xiriira Kalluumeysiga Soomaaliyeed.

Qodobka 4aad

Horumarinta Kalluumeysiga

Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda waxay qaadeysaa tillaabo kasta oo lagu horumarinayo Kalluumeysiga Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 5aad

Hababka Reeban

1. Cid kasta waxaa ka reeban in ay isticmaasho hab ama qalab waxyeello gaarsiin kara Nafleyda Biyo ku noolka sida Dilka, suuxinta, wasakheynta iyo Naafeynta oo ka imaan kara waxyaabaha qarxa Iwm.

2. Waxaa kaloo reeban in lagu haysto qalabkaas isaga ah goob Kalluumeysi.

3. Waxaa reeban in laga ganacsado ama lala kala wareego Kalluun ama Nafley Biyood kale oo lagu soo qabtay hababka ku xusan Qod. Faqraddiisa Koowaad.

Qodobka 6aad

Xiridda Biyaha iyo Xilliyada

Wasiirku wuxuu soo saari karaa amar qoraal ah oo lagu xirayo xilli Kalluumeysi, goob nooc qalab iyo nooc Kalluun ama Nafley Biyood, amarkaasi waa in lagu sheegayo muddada bilowgeeda iyo dhammaadkeeda. Waxaa kale Wasiirku wax ku dari karaa ama ka dhimi karaa muddadaas iyada ah mar kasta oo ay noqoto lagama maarmaan.

Qodobka 7aad

Nidaamka Guud ee Ruqsadaha Kalluumeysiga

1. Wasaaradda Kalluumeysigu waxay ruqsad Kalluumeysi ku bixin kartaa Badda Dalka iyo Biyaha Gudaha Intaba.

2. Cid kasta oo dooneysa in ay ka Kalluumeysato ama ku beerto Kalluun Biyaha Soomaaliyeed waa in ay haysataa ruqsad Kalluumeysi iyo ruqsadda soo gelitaanka Dalka. Ruqsaddaasi ma quseyso dadka aan isticmaalin Gaadiid Badeedka.

3. Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda markay sugto shuruudaha ruqso bixinta, codsadaha waxay siinaysaa ruqsad Kalluumeysi waxayna u sameyneysaa ruqsadaha Sharcigan lagu bixinayo Diiwaan gaar ah.—

4. Ruqsadaha Kalluumeysiga waxaa lagu weydiisanayaa codsi qoraal ah oo lagu tilmaamayo arrimaha Soo Socda:

b) Magaca, Faahfaahinta Markabka, Calanka iyo Dekedda laga Diiwaangeliyey.
t) Magaca Milkilaha, Ijaartaha, haddii uu jiro, Kabtanka Markabka (Naakhuude).
j) Lambarka Markabka.—
x) Faahfaahinta Kalluumeysiga uu soo codsaday Arjiluhu sida:

I) Nooca uu doonayo in uu Kalluumeysto.

II) Habka Kalluumeysiga iyo nooca qalabka uu isticmaali rabo.

III. Goobaha wax soo saarka lagu dejinayo iyo Faahfaahinta suuqeynta, meesha ugu dambeysa uu aadayo iyo isticmaalka wax soo saarka.

IV. Goobaha uu ka Kalluumeysanayo.

V. Cadadda Kalluunka ama biyo ku noolka kale oo la qaban doono.

VI. Waqtiga lagu talo gelayo in ruqsaddu ansax ahaato.

VII. Faahfaahinta Kaaliyaha, Xannaaneynta, habeynta iyo magaca iyo ruqsadda Maraakiibta oo la hawlan.

kh) Faahfaahinta isla wadaag ama siyaabo kale oo dan Soomaaliyeed u soo gali karo howsha Kalluumeysiga.—

d) Xog kasta oo Wasaaraddu warsato si uu ku caddeeyo ama ku Faahfaahiyo Muraadkiisa.

r) In uu wato Damaanad Banki (Bank Guarantee).

5. Isbeddel kasta oo ku dhaca Markab la siiyey ruqsad, sida Milkiyad la wareejiyey ama la sii ijaartay waa in lagu soo wargeliya Wasaaradda Kalluumeysiga muddo soddon (30) beri gudahood ah.—

6. Markab kasta oo la siiyo ruqsad Kalluumeysi waa in lagu qoraa Markabka dushiisa iyo dhinacyadiisaba Lambarka ruqsadda, magaca Markabka iyo Dekadda uu ka Diiwaan gashan yahay.

Qodobka 8aad

Waajibaadka Kalluumeystaha

Cid kasta oo la siiyo ruqsad Kalluumeysi waxaa ku Waajib ah:

b) Inuu dhowro Shuruucda Dalka iyo Xeerarka Wasaaradda.

t) Inuu keeno warbixin joogto ah oo ku saabsan Arrimaha Kalluumeysiga sida tirada, noocyada oo ay ku jiraan haraaga (bycatch) wax soo saarka, meesha iyo sida loo heli karo Kalluun iyo Nafley biyood kale oo laga ganacsado ama la habeeyo.

Qodobka 9aad

Cilmi Baaris

Wasiirka Kalluumeysigu wuxuu qoraal ahaan ugu oggolaan karaa cid kasta ama Markab kasta inuu sameeyo cilmi baaris iyo hawlo kale oo la xiriira macluumaadka Khayraadka Biyaha, isagoo haysta ruqsadda soo gelitaanka Dalka.

Qodobka 10aad

Kormeerka iyo Baarista

1. Cid kasta oo Kalluumeysanaysa waa la kormeerayaa lana baari karaa marka ay timaaddo baahi, ka sokow Hay'adaha Baarista, waxaa fulin kara hawshaas Gob. Deg. iyo ciddii kale oo loo xilsaaro, iyada oo markasta Wasaaradda laga haysto oggolaansho.

2. Marka ay sugnaato in loo gefay Sharcigan, eedeysanaha iyo Markabkiisa waa in la geeyo Dekedda ugu dhow ee Dalka.

3. Haddii Markab ku galo dambi biyaha Soomaaliyeed kana tillaabo Xuduudda Biyaha Soomaaliyeed waxaa lagala xaajoonayaa Dalka uu galay iyadoo la raacayo shuruucda Caalamiga ah.

Qodobka 11aad

Kalluumeysiga Hiddaha iyo Casriga

Wasaaradda Kalluumeysigu waa in ay dhiirri gelisaa Horumarinta Kalluumeysiga Hiddaha (traditional) iyo kan Casriga (industrial) iyo dhammaan amuuraha la xiriira, iyada oo la kaashaneysa Hay'adaha Dawladda ee ku haboon. Waxaa kale oo ay xaqiijinaysaa in aan Kalluumeysiga Casriga ahi dhibaato u geysan ama hakinin horumarinta Kalluumeysiga Hiddaha, iyada oo la qaadayo tallaabooyinka ku haboon oo isu dheellitiraya.

Qodobka 12aad

Ciqaabaad

1. Cid kasta oo u gefta qod. 8aad iyo 10aad ee Shar-

cigan wuxuu muteysanayaa Ganaax Ciqaabtiisu u Dhexeeyso.

b) Sh.So. 1000 ilaa Sh.So. 10.000 (tobankun) Huuriyada iyo Doonyaha Shiraaca leh ee aan Motoorka lahayn.

t) 1. Sh.Sh. 10.000 ilaa Sh.So. 15.000 Doonyaha Motoorka leh ee quwaddoodu u dhexeyso 6 HP ilaa 30 HP.

2. Sh.So. 16.000 ilaa Sh.So. 30,000 Doonyaha Motoorka leh ee quwaddoodu u dhexeyso 31 HP ilaa 60 HP.

3. Sh.So. 31.000 ilaa Sh.So. 50.000 Doonyaha Motoorka leh ee quwaddoodu u dhexeyso 61 HP ilaa 100 HP.

j) Sh.So. 1.700.000 ilaa Sh.So.. 4.000.000 ama Lacag u dhiganta ee, Ajnabi ah Maraakiibta 101 HP iyo ka Sarreeya.

Haddii Dembiga uu galay intaa ka cuslaado ama uu ku noqdo isla falkaas waxaa lala tiigsanayaa Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.

2. Cid kasta oo adeegsata ama ku istiemaasha waxyaabaha soo socda, waxay muteysanaysaa Xarig u dhexeeya 3 ilaa 10 sano ama ganaax ah Sh.So. 5.000,000 ilaa Sh.So. 50.000,000 ama labada Ciqaab oo wada jira.

b) U adeegsado waxyaabaha qarxa, Sunta, IWM.

t) Ka Kalluumeysta ama ku haysta qalab goob laga Mamnuucay.

j) Kalluumeysta Xilli Xir.

x) Kalluumeysta Nooc Kalluun ama Nafley Biyood kale oo la reebay in laga Kalluumeysto.

kh) Ku Kalluumeysato qalab aan loo ruqsayn.

3. Cid kasta oo iska indha tirta ama diidda inay keento Xogwaranka laga doonayey ama fulin weyda waajibaadkii Sharci ahaan looga reebay waxay muteysaneysaa ganaax Ciqaabtiisu u dhexeyso Sh.So. 20.000 ilaa Sh.So. 50.000.

4. Cid kasta oo ka soo bixi weyda xilkeeda waaji-

baadkeeda iyo heshiisyada lala galay waxaa lagala noqonayaa ruqsaddii horay loo siiyey.

### Qodobka 13aad

### Awoodda Xoojinta Shraciga

Awoodda Xoojinta Sharcigan waxaa u xilsaaran in fuliyaan Ciidamada Badda ee Dalka.

### Qodobka14aad

### La Wareegid

Qof kasta oo lagu helo dambi lid ku ah Sharcigan Ciqaab kasta oo lagu qaaday ka sokow waxaa lagala wareegi karaa qalabka, Motoorka iyo shey kale oo kasta loo adeegsaday in lagu galo Dambiga.

Waxaa kale oo lagala wareegi karaa dhammaan Kalluunka ama Nafley biyood kale oo laga helo Markab kasta oo dambiga lagu galay dushiisa.

Qaadista dambiyada ku xusan Sharcigan waxaa awood u leh Maxkamadda Badbaadada Dalka.

### Qodobka 15aad

### Xallinta Idaariga

Haddii gefka la galay uusan saas u cusleyn, Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Khayraadka Baddu waxay ku xallin kartaa gefka iyadoo kala xaajooneysa ciddii ay Khuseyso Arrintu.

### Qodobka 16aad

### Xeerarka

1. Madaxweynuhu marka uu dhegeysto talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda, wuxuu soo saari karaa Xeer hoosaad lagu fulinayo Sharcigan.

2. Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Baddu wuxuu soo saari karaa Xeer Nidaamiye ku saabsan habsami u maareynta iyo horumarinta Kalluumeysiga.

### Qodobka 17aad

### Dhaqangelinta iyo Tirtirid

1. Dhammaan Sharciyada ka hor imaanaya ama aan la socon karin Sharcigan waa la tirtiray.

2. Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Nov. 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 24 Taariikh 1 Dec. 1985 Oggolaasha ha Heshiiska fududeynta iyo horumarinta isdhaafsiga Ganacsiga ee ka dhexeeya Dawladaha Jaa/da Carabta.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Meelmarinta Heshiiska Fudu deynta iyo Horumarinta isdhaafsiga Ganacsi ee ka dhexeeya Dawladaha Jaamacadda Carabta.
2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Tuunis ee Dalka Tuunisiya taariikhdu markey aha yd 17 Febraayo 1981.
3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyad da Dimoqoraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. waxaa Awood loo siiyey inuu Meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku Tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1da Disember 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

## XEER

UJEEDDO: Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 42 Taariikh 1 Dec. 1985 Meelmarinta Heshiiska Fududeynta iyo Horumarinta Isdhaafsiga Ganacsiga ee ka dhexeeya Dawladaha Jaamacadda Carabta.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, Faqraddiisa 5aad iyo Qod. 82aad, Faqraddiisa 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Dis 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Tirsigiisu yahay ee 1da Dis. 1985 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Ujeeddada ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la Meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la Meelmariyey Heshiiska lagu kala saxiixday magaalada Tuunis ee Dalka Tuunisiya taariikhdu markay ahayd 17ka Febraayo 1981, kuna saabsan Fududeynta iyo Horumarinta Iskaashiga Ganacsi ee ka dhexeeya Dawladaha Jaamacadda Carabta.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa Awood Sharci.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1da Disember 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٤٢ بتاريخ ١ ديسمبر ١٩٨٥
التصديق على الاتفاقية الخاصة بتيسير وتنمية التبادل التجارى
بين الدول العربيـــــة ..

رئيس الجمهوريـــة

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المـــادة ٨٢ مــــن الدستـــور ..

وعلـــى القانون رقم ٢٤ بتاريخ ٢٣ ديسمبر ١٩٨٤ الخاص بتعديل الدستور.

وعلـــى القانون رقم ١٤ بتاريـــخ ١ ديسمبر ١٩٨٥ بشـــأن موافقـــة مجلس الشعب على الاتفاقية المبينة أعـــلاه ..

ونظرا للضرورة الدائمة فى التصديق على هذه الاتفاقية ..

بما هو آت

يرسم

المادة الأولى

تم التصديق على اتفاقية تيسير وتنمية التبادل التجارى بين الدول العربية المبرمة فى مدينة تونس بتاريخ ١٧ فبراير ١٩٨١م ..

المادة الثانيـــة

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية.

المادة الثالثـــة

يسرى ويعمل هذا المرسوم اعتبارا من تاريخ التوقيع عليـــه من قبل رئيـــس الجمهورية وينشر فى الجريدة الرسميـــة..

مقديشـــوه فـــى ١ ديسمبر ١٩٨٥م ..

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية
— محمد سيـــاد برى

XEER: Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka L. 8 Abuurista Qaybta Ilaalinta Duulista Hawada.

WASIIRKA

Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka

MARKUU ARKAY: Qod. 1 (a) (b) (d) (e) ee Dekree to 9,9,65 Lam. 13 lana Sharciyeeyay 21,11 65 lam. 18
MARKUU DHEGEYSTAY: Wasiirka Maaliyadda.
MARKUU TIXGELIYEY: Baahida Deg Degga ah ee Loo qabo in la Asaaso Qeybta Ilaalinta Duulista Hawada ee Dayuuradaha ka Diiwaan gashan Soomaaliya. iyo Kormeerka Hay'adaha, ka hawlgala Diyaaradaha.

WUXUU XEERIYEY

Qodobka 1aad

Waxa la Asaasay Qaybta Ilaalinta Duulista Hawada oo ka tirsan Agaasinka Guud ee Duulista Hawada (Airworthiness Division), si loo sugo Ilaalinta Diyaara daha ka Diiwan gashan Soomaaliya iyo Kormeerka Hay adaha ka hawlgala Diyaaradaha, loona baajiyo Lacagta Adag oo muddo dheer Qaranka laga Qaadayey.

Qodobka 2aad

QAABKA DHISMAHA QAYBTA

Qaybta Duulista Hawada waxay u sameysantahay Sida soo socota:

1. Madaxa Qaybta (1) Hal Jago
2. Laanta Diyaaradaha iyo Injiinada (1) Hal Jago
3. Xoghaye Xisaabiye

La Taliye Duulista
La Taliye Sharci

Qaybtan hadda la asaasay waxay maamul ahaan hoos imanaysaa Agaasinka Waaxda Hawada iyo Duu/ta

La Taliyaha Sharciga waxaa laga soo magacaabayaa Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

Qodobka 3aad

HAWLAHA QAYBTA AIRWORTHINESS

Hawlaha loo Xilsaaray Qaybta waxa Weeye.

1. Hagaajinta Heerka (Standard) iyo Qaabka (Procedure)

   Shahaadada Nooceeda (Type Certificate) ee Dayuu radaha iyo Qalabkooda, Matoorada (Power Plants, Sistemiska (Syetem) Saacadaha iyo Qalabkooda (Instrument iyo Equipment).

2. Oggolaashaha Shahaadada Nooceedka (Type Certificate) Dayuuradaha Motoorada ee ay bixisay Daw lad kale,

3. Oggolaanshaha Nakhshadaha Dayuuradaha, Sistem kooda, Qalabkooda (Equipment) iyo Saacadahooda.

4. Qiimeynta iyo Kormeerka Dayuuradda si loo siiyo Shahaadad Nooceedka (Type Certificate).

5. La socodkaHeerka Airworthiness ka Waddanka.

6. Bixinta Tilmaamaha Airworthiness ka (Airworthiness Directives).

7. Ilaalinta is haysashada Dhismaha Dayuuradaha Shaqaynaya iyo Go'aaminta hawlaha siyaadada ah ee laga qabanayo Suplement Inspection programs) si loogu hayo xaalada Nabedgelyo (To Maintain the Airworthinemss Conditions).

8. Ilaalinta Service Bulletins ka ka soo baxa Warshadaha Dayuuradaha (Manufacturers) iyo Airworthiness Directiveska Ainabiga ah si loogu daro qorshaha Haintenenoo ka Dayuuradaha Waddanka Jooga

9. Diyaarinta soo jeedinta iyo ku kordhinta wixi Sharciyo cusub ah ama Civil Aviation ka ee la xiriira Airworthinessk.

10. Bixinta talooyinka Farsamo iyo kuwa Duulimaad ee la xiriira Nabadgelyada Dayuuradaha.

11. Xidhiidhinta Warshadaha Dayuuradaha jooga Soomaaliya iyo Authoritiga siiyey Shahaadad Nooceedka (Type Certificate).

12. Beerista Cilladaha waaweyn ee la helay in-sax ah loo qabto.

13. Haaiinta Diiwaanka Dayuuradaha Civilka ah.

14. Kaluudaada iyo Shaqagelinta Araajida lagu soo cod sanayo siinta ama Cusbooneysiinta.

15. Baarista Dayuuradaha loo rabo ama cusbooneysii nta Shahaadada Nabadgelyada (Airworthiness certificate) iyo dhameystirka Document-keeda.

16. Diiwaangeliinta iyo dhaqan gelinta Araajida Shaqaalaha ee siinta ama Cusbooneysiinta Shahaadoo yinka Farsama Yaqaannada (Issue and Renewal of Maintenance Liness).

17. Diyaarinta iyo Maamulka Imtixaannada, bixinta Cusbooneysiinta, iyo Qiimeynta Laysamada.

18. Diyaarinta Habka Lacagta loo qaadayo iyo ururin ta Lacagta laga qaadayo, A/C Registration, Certifi cate of Airworthiness iyo Shaqaalaha la siiyo Shahaadooyinka.

19. U kuurgalka Cilladaha khibradda lagu yeeshay, la Socodkooda iyo Sicitaankooda.

20. Kormeeridda Hoosooyinka Dayuuradaha, Qalabkooda iyo la socodka Waxbarashada Shaqaalaha Fa rsamada, la socodka Hay'adaha Kormeerka (Quali ty Control Procedures) iyo loo siiyo Shahaadada loo yaqaan (Air Operator Certificate).

21. Kormeeridda Qalabka iyo habka shaqo ee Hay'ada ha si loo siiyo ama loo cusbooneysiiyo Certificate of Approval oo lagu wadi doono hawlaha la xiriira Airworthiness-ka.

22. Kormeer Wakhti leh oo loogu kuurgelayo meelaha Hawsha Farsamada iyo habkooda Shaqo ee Hay'ad daha haysta Air Operator Certificate, iyo Certifica te of Approval, isla markaa waa in la toosiyo oo loo tilmaamaa sida Sharciga Waafaqsan.

23. Hubinta Shahaadooyinka Dalka iyo u qalanka waa jibaadka oo la xiriira Airworthiness iyo la talintoo da.

24. Qiimeynta Nakhshadda iyo Oggolaanshaha isticmaalkooda iyo saaridanka Dayuuradaha.

25. Hore Umarinta Kalsoonida Dayuuradda iyo Qalab ka saaran Oggolaanshaha Maintenance-ka.

26. Ka qaybgalka Guddiga Baaritaanka markasta oo Shil Dhaco.

27. Soo Jeedinta Awaamirta Farsamo (Issuance of Directives) iyo Qawaaninta Waddanka ee la xiriirta Nabad gelyada Dayuuradda iyo Qalabkooda.

28. Diyaarinta iyo qeybinta war isgaarsiinta Farsamo ee la xiriira Airworthiness-ka xitaa haddii uusan ahayn mid khasab ah, laakin wax tar u leh Nabad gelyada Duulimaadka.

29. Oggolaanshaha Xubnaha Kormeerka ee Hay'addaha Farsamada (Approval For Inspection).

30. In la bixiyo Shahaaddo dhaxaaq.

Qodobka 4aad

Gunnada Shaqaalaha Qaybta iyo Madaxa ka qayb gasha Shirarka la qabto Todobaad kasta, waxaa lagu Xadidayaa Warqad Ballanqaad ah ee u saxiixo Was/ka.

Qodobka 5aad

Xeer kasta ee ka soo horjeeda waa la baabi'iyey.

Qodobka 6aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 1da Jannaayo 1985ta.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 158
Muqdisho, 23 Nov. 1985
Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud
Dr. Maxamed Abshir.

(Cabdullaahi Maxamuud Mire K/S)
WASIIRKA GAADIIDKA DHULKA IYO CIRKA

..XKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HAR/SA
TIRSI/MGH 2/85 Taariikh 12.10.85

UJEEDDO: Dikreeto Cusboonaysiin Jeega War, Lam. yahay 63,1823 ee 29,9,85 Lacagtiisuna dhan tahay Sh,So. 20,000 kuna qornaa magaca C/maan Ibraahim Faarax, uuna leeyahay Maxamed Aw Axmed Aw Muxumad.

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/lt Max'd Aw Axmed Aw Muxumad kuna taariikhaysan 8,10,85 kuna Codsanaayey in loo cusboonaysiiyo J. Warega Lambarkiisu yahay kan kor ku qoran.

MARKAAN ARKAY: Caddeynta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Lambarkeedu yahay 1472 kuna taariikh aysan 12,10,85 laguna soo caddeeyey in laga sameeyey Bankiba Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa uuna lumay lagana Faafiyey Laanta Hargeysa, iyada oo Jeegaasi ku qornaa J/le Cabdiraxmaan Ibraahim Faarax.

W U X U U

Go'aamiyey in la kansal gareeyo Leega Lumay ee Lam. yahay 631823 29,9,85 loona cusbooneysiiyo J/laha magaciisu yahay Maxamed Aw Axmed Aw Muxumad Cusboonaysiintana Gacanta laga saaro J/laha magacii su kor ku xusan yahay ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood Gudahood ah,kadib maalinta Go'aaanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah Laanta Madaxtooyada J.D.S.

W A X A A

La Farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Hargeysa, is lagu dhaqmo Nuqulka Go'aankan Bankiga Iridiisa si ciddii haysataa Jeegaas lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho had dii ay doonaan Go'aankan waxaa loo cuskaday Qodoba da kala ah 69-70 ee X.L.Y. 2 ee soo baxay 9,9-65kii.

Taariikh 12.10.1985

Maxamuud Jaamac Cigaal
Kaaliyaha Maxkamadda Gob. W/Galbeed Hargeysa
Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. W. G. Hargeysa
Ibraahim Faarax Maxamed

I, 500

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HAR/SA
TIRSI/MGH/19/85 Taadiikhda 21,8,85

UJEEDDO: Digireeto Cusboonaysiin Jeeg War. oo Lu may Lambar yahay 593281.

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Yaasiin Maxamed Boqore, ee ku taariikheysan 18,8,85. Uuna ku codsanaayo Cusboonaysiinta Jeega War. ee sare ku qoran ee Lumay.

MARKUU ARKAY: Caddeynta Bankiga ee Lambarkeedu yahay 1255 ee ku taariikhaysan 18,8,85 ayna ku cadeeyeen in Jeegaas Lambarkiisu yahay 593281 Lana sameeyey taariikhdu markay ahayd 8,6,85, La cagtiisuna dhan tahay 9.000 kuna qoraa Cali Cumar Liibaan, lagana sameeyey Bankiga Laanta Boorame.

MARKUU ARKAY: Taarika Faafinta ah ee Bankigu Laamihiisa u wada diray taariikhdu markay ahayd 10.8.85.

MARKUU ARKAY: Qodobka 69-70 ee X.L.Y, 2 ee soo baxay 9,9,65kii.

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeegaas ku qoran uu iska leeyahay Yaasiin Maxamed Boqore.

W U X U U

Go'aamiyey in la kansal Gareeyo Jeegga War. ee Lumay ee Lambarkiisu yahay 593281, loona cusboonaysiiyo Yaasiin Maxamed Boqore, cusboonaysiintana Gacanta laga saaro J/lahaas ama cid awood buuxda ka haysata muddo 15 Casho gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D.S.

W A X A A

La Farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bankiga Iridiisa si ciddii haysata Jeegaas lumay ee kor lagu kansal Gareeyey uga soo qortaan cabasho had dii ay doonaan.

Kaaliyaha Maxkamadda Gob. W/Galbeed Hargeysa
Maxamuud Jaamac Cigaal

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. W. G. Hargeysa
Ibraahim Faarax Maxamed

L. 501

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HAR/SA

TIRSI MGH/14/85. Taariikhda 8,8,85.

UJEEDDO: Digereeto Cusboonaysiin Jeeg War. oo Lu may Lambarkiisu yahay 0157482.

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdikariin Siciid Raage, ee ku taariikhaysan 7,7,85, uuna ku codsanaayo Cusboonaysiinta Jeega War. ee sare ku qoran ee Lumay.

MARKUU ARKAY: Caddeynta Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, Lambar yahay 1075 ee ku taariikhaysan 20.7.85, ayna ku soo Cadeeyeen in Jeegaas Lambar yahay 0157482 laga sameeyey Laanta Hargeysa Lacagtiisuna dhan taa ay 45,000 lana sameeyey 11,6,85 kuna qoraa Cabdullaahi Yaasiin Axmed.

MARKUU ARKAY: Taarka lagu Faafiyey Laamaha Bankigada ee loo wada diray, ee ku taariikheysan 21,6,85.

MARKUU ARKAY: Qodobka 69-70 ee X,L,Y, 2 ee soo baxay 9,9,65kii.

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeegaas ku qoran yahay Cabdullaahi Yaasiin Axmed iskana leeyahay Lacagtaas Ninka magaciisd yahay CabdiKariin Siciid Raage.

WUXUU

Go'aamiyey in la kansal gareeyo Jeegga War. ee Lumay ee Lambarkiisu yahay 0157482, loona cusboonaysiiyo Cabdikariin Siciid Raage, Cusboonaysiintana Gacanta laga saaro J/lahaas ama cid awood buuxda ka haysata, muddo 15 Casho gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D. Soomaaliya.

WAXAA

La Farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo ka ydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aan kan Bankiga Iridihiisa si cidii haysata Jeegaas lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan, Cabasho haddii ay doonaan.

Kaaliyaha Maxkamadda Gob. W/Galbeed Hargeysa

Maxamuud Jaamac Cigaal

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. W. G. Hargeysa

Ibraahim Faarax Maxamed

L. 502

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

UJ: Baafin Jeegag Lumay
(Guddoomnyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY; Dacwadda ku saabsan Baafin J/-Wareega ee Lam. 0000396-0000397-0196982-0439473-0197089;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco, taariikh 28.11.85;

HADDUU ARKAY. Qod. 69, 65,) Lumid Jeegagga Wareega ee kala ah: 1— 0000396 ee Tr. 1.10.85 lagana sameeyay L. Badhan Sh.So. 50.000/ 2— 0000397 ee Tr. 1.10.85, lagana sameeyey L. Badhan Sh.So, 40,000/ ee ku qoran J/le Aadan Xirsi Maxamed 3— 0196982 ee Tr. 19.9.85 L. Burco Sh. So, 29,950/ ku qoran Aadan Xayle Nuur 4— 0439473 ee Tr. 29.8.85 L. Burco Sh.So. 100,000/ 5— 0197089 ee Tr; 21.9.85 L. Burco kuna qoran Maxamed Ca'bdillaahi Xanduile Sh. So. 50,000/ Jeegga 4aad ee Boqolka Kun ah waxaa ku qoran Maxamed Nuux Warsame.

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee kor ku xusan J/le Aadan Xirsi Maxamed markii ay ka soo wareegto 20 cisho laguna shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Aadan Xirsi Maxamed iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

BURCO, 28.11.85

Guddoomiyaha Max. G. Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

# MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG

## GUDDOOMIYAHA MAX. G. SANAAG CEERIGAABO

MARKUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: In Jeegagga, J/W. Lr. 0023263 ee 4.9.85 iyo J/W. Lr; 0023262 ee 4,9,85, lagana sameeyey labadaba B.G.K.S. Laanta Ceerigaabo, kuna qoran tahay midkiiba lacag dhan (50.000) Sh. So. ayna lahaayeen 1)— Maryan Faarax Maxamed iyo Shamis Faarax Maxamed, in labadaas Jeegba Maydhmeen wax raad ahina aanu ka hadhin siday u maydhmeen, sida ku cad xaashida Sum. 000341 kana soo baxday B.G.K.S, Laanta Ceerigaabo;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 ee D.L. 2 ee 9.9.65;

WUXUU XEERIYEY SIDAN

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/W. Lr. 0023263 iyo 0023262 ee 4.9.85, ee laga sameeyey B.G.K.S, Laanta Ceerigaabo, kuna kala qoran yihiin, Shamis Faarax Maxamed iyo Maryan Faarax Maxamed, Jeegaggaas oo ay ku qoran tahay midkiiba lacag dhan (50,000) Sh.So.

Waxaa la oggolaaday in B.G.K.S, Laanta Ceerigaabo u bedesho Jaalle Shamis Faarax Maxamed iyo Maryan Faarax Maxamed, Jeegagga kor ku xusan, loona sameeyo kuwo la mid ah, markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn shan iyo toban maalmood (15) beri, marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ah ee Soomaaliya.

Ceerigaabo, 14.10.85

GUDDOOMIYAHA MAX. G. SANAAG
(Dr. Maxamuud Maxamed Ismaaciil)